

Waxa la oggolaanayaa in dadka saddex irbadood ku tallaalan laga dhaafo tijaabada PCR-ta

Wasiirka caafimaadka iyo daryeelka Ingvild Kjerkol waxay oggolaatay in tijaabada nooca PCR laga dhaafo dadka qaatay saddex irbadood oo tallaalka ah ama qaatay labo irbadood islamarkaana uu koroonuhu ku dhacay saddexdii bilood ee u dambeeyay. Tan oo macnaheedu yahay in marka dadkaasi ay iskood tijaabo iska qaadaan oo tijaabaduna sheegto in ay cudurka qabaan, aanay u baahnayn in ay tagaan xarun tijaabo-qaadis. Laakiin waxa islamarkaana la rabaa in dadku ay isticmaalaan nidaamyada degmooyinka ee loogu talagalay diiwaangelinta natiijada tijaabooyinka ay dadku iskood iska qaadeen.

Sababta wax-ka-beddelista loo sameeyay waxay tahay in is-qaadsiinta cudurka ee sii badannaysaa ay culays ku keenayso awoodda tijaabo-qaadista ee degmooyinka.

- Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynaha ayaannu 20-kii Jannaayo ka codsanay in ay qiimeeyaan nidaamka tijaabo-qaadista, iyadoo wakhtigii loo qabtay uu ku eg yahay maanta 21-ka Jannaayo. Marka la eego jawaabtooda waxa cad in hadda la oggolaan karo in dadka qaatay saddex irbadood ama qaatay labo irbadood oo islamarkaana uu cudurku ku dhacay saddexdii bilood ee u dambeeyay laga dhaafi karo in ay iska soo qaadaan tijaabo PCR ah oo xaqiijin ah. Ka dib markii aan arkay jawaabaha ka yimi hay'adahaas, waxa aan Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynaha faray in ay sida ugu dhakhsaha badan la hadlaan degmooyinka oo ay islamarkaana

wax ka beddelaan talooyinka ku saabsan dadka loo fidinayo tijaabooyin PCR ah oo xaqiijin ah, ayay tidhi wasiirka caafimaadka iyo daryeelka Ingvild Kjerkol.

Ku dhawaad 2,5 milyan qof ayaa qaatay irbadda saddexaad. Waxa soo raacaya dadka qaatay labo irbadood ee isla markaana cudurku ku dhacay saddexdii bilood ee u dambeeyay. Waa qayb weyn oo ka mid ah dadweynaha, waxaanay wax-ka-beddelistu culayska ka yaraynaysaa degmooyinka. Dadkan wax-ka-beddelistu wax saamayn ah ma ku lahaan doonto xaaladooda shaahaadada koroonaha, waayo markooda horeba waxa loo arkaa in ay yihiin dad si buuxda u tallaalan.

- Anigu waxa aan rabaa in la helo xalal culayska ka yaranaya degmooyinka, ayay tidhi Kjerkol. Dhammaan dadka cudurka iska hela ka dib marka ay iskood tijaabo iska qaadaan, waxa lagu boorinayaa in ay iska diiwaangeliyaan nidaamyada degmadooda. Is-diiwaangelintani waxa ay muhiim u tahay in hay'adaha caafimaadku la socon karaan xaaladda is-qaadiinta cudurka. Ilaa hadda 132 degmo oo ay hoos imanayaan 4 milyan oo qof ayaa leh nidaamyo noocaas ah. Wakhti dhow Dalladda Degmooyinka (KS) ayaa nidaam noocaas ah u fidin doonta degmooyinka aan lahayn mid u gaar ah, islamarkaana Agaasinka Caafimaadka ayaa ka masuul ah dabagalka arrintaas.